

# Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Cudurka Gacanta, Cagta, iyo Afka

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu waxa dhici karta inuu ka qaaday cudurka **Gacanta, Cagta, iyo Afka** Xarunta Head Start/ECEAP. Waa xanuun aad u badan oo uu fayras keeno.

**Waa maxay astaamuhu?** Boogo sida alsarka ah oo afka, cirridka iyo dhinacyada carrabka ka soo baxa. Finan nooca dheecaanka leh ah oo ka soo baxa baabacooyinka gacmaha, cagaha hoostooda, iyo mararka qaar badhyaha. Xummad, madaxanuun, cune xanuun, iyo/ama duuf ayaa sidoo kale jiri kara.

**Sidee ayey ku faaftaa?** Dhibco dareere ah oo ka yimaada qofka xanuusan kaasi oo qufacaya ama hindhisoonaya. Taabashada tooska ah ee waxyaalaha ka yimaada sanko iyo cunaha iyo saxarada qofka xanuusan.

**Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan?** 3-5 maalmood kadib qaadista waxaana dhici karta inuu jiro 7-10 maalmood.

**Ma u baahanahay inaan ilmaha guriga ku hayo?** Maya, ilaa aanu awoodin inuu kaqaybqaato hawlaha ama xumjadi jirto.

Haddii ilmahaagu yeesho astaamahan fadlan ka raadso baadhis iyo daawayn bixiyaha daryeelka caafimaadka. Fadlan wargeli xarunta Head Start/ECEAP haddii ilmahaaga laga helay xanuunkan.

Shaqaalaha: \_\_\_\_\_ Taleefanka: \_\_\_\_\_

Xarunta: \_\_\_\_\_